

Kulankii Caawa ee Golaha Gudiga Waxbarashada, Kormeeraha guud Jett wuxuu la wadaagay in mas'uuliyiinta degmada ay saadaalinayaan in ay wiigaan tirada kiisaska COVID ay kabadanayaan 30. Iyadoo la raacayo Badbaadada Qorshaha Waxbarashada ee Barasaabka Gobolka, **tirada kiisaska waxuu kuqasbayaa Degmada Aagga St. Cloud inay uwareejiyaan waxbarashada guri-jooga ah fasallada 6-12 ee iskuulada Kennedy, North, South, Apollo, McKinley iyo Tech.**

Waxaan u bilaabi doonaa Iskuuladaan Waxbarida Gurijooga Isniinta, Oktoobar 19, waxayna ku sii jiri doonaan qaabka Waxbarida Gurijooga illaa xogta caafimaadka ee degmadu ay yaraato oo ay kahoos marto 30 ugu yaraan saddex toddobaad oo isku xigta.

Iyada oo uu ogalaanayo Qorshaha Nabadda Waxarashada, waxaan u isticmaali doonaa Arbacada, Oktoobar 14 maalin kala wareeg ah shaqaalaha dugsiga sare inay u diyaargarobaan qaabkan waxbarasho ee cusub. Arbacada, ma jiri doonto wax duruus cusub ah oo ay qaadanayaan ardayda fasalada 6-12. Ardaydu waxay u isticmaali karaan maalintan inay dhammaystiraan laylisyada ama hawlo horay looga rabay, laakiin uma baahna inay galaan Schoology.

Iskuulada Agagga St. Cloud waxay hormariyeen qaabka waxbarashada gurijooga ilaa isbiriinkii la soo dhaafay marka loo fiiriyo fikir celinta ay bixiyeen qoysaska, ardayda, iyo shaqaalaha. Waxaan ugu yeeraynaa qaabkan barashada guriga "Barashada Guriga 2.0". Waa tan waxa aad ka filan karto "Barashada Guriga 2.0".

- Fasalada 6-12 ardayda aadda iskuullada soo socda waxay u gudbi doonaan Barashada Guriga 2.0 oo bilaabanaya Isniinta, Oktoobar 19:
  - Kennedy (fasalada 6-8 kaliya)
  - North Junior High School
  - South Junior High School
  - Apollo High School
  - McKinley Alternative Learning Center
  - Tech High School.

Ardaydani waxay iskuulada kaga xaadiri doonaan khadka tooska ah maalin kasta. **Ardayda ma raaci doonaan qaabkooda A/B inta lagu guda jiro Barashada Guriga 2.0.** Dhammaan ardayda waxaa laga filayaa inay galaan Schoology bilowga fasallada loo qorsheeyay maalin kasta, waqtiga go'an. Jadwalka Bell iyo Jimcada Flex ayaa sii ahaan doona sidooda.

- Dhammaan ardayda ka diiwaangashan barnaamijyada waxbarashada gaarka ah ee Riverwoods, Roosevelt Education Center, Clara's House, Journey, 180 Group Home, InStep, CO2 iyo Recovery Plus waxay sii ahaan doonaan kuwa xaadira shaqsi ahaan, iyadoo raacaya jadwalkii ay haysteen.
- Ardayda ka diiwaangashan fasallada Pre-K-5 iyo Macadka Barashada Guriga ma aysan saamaynin arintaan kala guurka ah.
- Cunnooyinka waxaa la gaarsiin doonaa qoysaska iyada oo loo sii marinayo goobaha loo dhigo ee xaafadaha dariska. Waqtiyada iyo goobaha la dhigayo cuntada waxay la mid tahay qaabkii loogu gayn jiray Isbiriinkii lasoo dhaafay. Waqtiyada saxda ah iyo goobaha cuntada la geyn doono ayaa loo sheegi doonaa qoysaska maalmaha soo socda waxaana lagu soo qori doonaa websaydka.
- Ilmo haynta ardayda dhigata fasallada K-6- waxaa bixiya Haayada Central Minnesota Boys & Girls. Macluumaadka diiwaangelinta waxaa laga heli karaa: <https://www.bgcmn.org/kidstop/>.

- Dawooyin iyo wixii muhiim u ah waxbarashada waxaa laga soo qaadan karaa iskuulkaada Arbacada, Oktoobar 14 inta udhaxeysa 8:00 am –4: 00 pm iyo Isniinta, Oktoobar 19 inta udhaxeysa 11:00 am – 6:00 pm. Qoysasku waa inay ilaaliyaan kala fogaanshaha bulshada oo ay xirtaan maaskarada markay joogaan iskuuladeena.
- Khadka Taleefoonka Taageerada Waalidka waxuu hayaa Ingiriis, Isbaanish iyo Soomaali waxaana laga heli karaa websaydkeena: <https://www.isd742.org/Page/9204>.

Waad ku mahadsantahay caawintaada sida aad u ilaalinaysid bulshada iskuulka caafimaadkeeda .